

Iskuxirka Casiriga ah ee Bulshada Soo Koreysa

Buundada Interstate waa isku xiraha laf dhabarta u ah gaadiidka magaalooyinka waaweyn ee Portland iyo Vancouver. Buundadu waxay tobanaan kun oo dad maalin walba ku xirtaa xafiisyo, warshado, dugsiyo, kulamada ciyaaraha, goobaha lagu cibaadeysto, dukaamo, maqaayado iyo goobaha madadaalada. Waxay xiriirisa qoysas, saaxiibo iyo dad deris ah.

Waxay isku xirtaa bulshooyin

Maadaama ay tahay wadada keliya ee si toos ah u socata waqooyi iyo koonfur inta u dhexeysa Canada iyo Mexico dhanka Xeebahan Galbeed, buundada Interstate waxay qeyb ka tahay marin ganacsiyeed muhiim u ah gobolka, dalka iyo ganacsiga caalamiga ah. Waxaa dhaafsiisan shubka, laamiga iyo biraha buundada Interstate muuqaal soo jiidasho leh, nidaam dabiici ah iyo taariikh hodon ah oo uu dhaxal ahaan u leeyahay gobolkeena.

Gobolada kala ah Oregon iyo Washington waxay ka wada shaqeynayaan sidii ay buundada sii gaboobeysa ee Interstate

ugu bedeli lahaayeen mid casri ah, u adkeysan karta dhulgariirada, qaab dhismeed noocyo kala duwan leh kaasoo dhaqdhaqaaq hormarsan siinaya dadka, alaabadaha iyo adeegyada.

Maxay tahay sababta aan ugu baahan nahay buundo midaan bedesha

Buundada Interstate waxay cabir ahaan ku fadidaa labo qeyb oo is dhinac yaala. Dhanka waqooyi u socda wuxuu dhisan yahay in ka badan 100 sano, wuxuuna dib ugu laabanayaa sanadkii 1917. Dhanka koonkureed waxaa la furay 1958. Qaab dhismeedka hadda xiligaas jiray looma naqshadeynin inay daboolaan baahiyaha gaadiid ee maanta jira. Barnaamijka wuxuu maraayaa qeybaha ugu horeeya ee la shaqeynta saamileyda iyo dadweynaha to loo cadeeyo dhibaatooyinka aan rabno inaan xalino. Waxaan sii ognahay hadda in dhibaatooyinkii lasoo wariyay tobanaankii sano ee ugu dambeeyay inay wali yihiin.



Dhibaatooyin hadda taagan oo aan wajaheyno.



Ciriiri: In ka badan 138,000 baabuur ayaa dul maray Buundada Interstate maalin walboo shaqo sanadkii 2018 kii, taasoo ay ka dhalatay 7 illaa 10 saacadood oo ciriiri ah xiliyada ugu mashquulka badan ee ay dadku safraayan



Badbaadada: Leeman ciriiri ah, aan marshibiyeeri laheyn, masaafada aragtida oo yar buundada korkeeda iyo hareeraheeda, wiishka buunadada oo si joogto ah loo istaajiyo, iyo wado kusoo darsameysa buundada kana sii bexeyso, intaas oo idil waxay kordhinayaan shilalka



U nuglaanta Dhulgariirka: Aas-aaska buundada hadda dhisan wuxuu ka sameysan yahay caro bacaad mana gaarayo gunta hoose. Haddii uu dhoho dhulgariir weyn, buundada waxaa soo gaari karo dhaawac aad u ballaaran



Dhaqdhaqaaqa gaadiid oo daciif ah: Ciriiri iyo wiishka buundada Interstate oo kor loo qaado waxay hoos u dhigayaan gaadiidka xamuulka ee wada alaabaha kuwaasoo mara I-5, taas oo ah wado laf dhabar u ah dhaqaalaha gobolada dhaca Xeebaha Galbeed



Wadooyin aan ku filneyn dadka lugeynaya iyo baaskiilada: Wadooyinka la wadaago ee ciriiriga ah, joogga tariinada oo hooseeya, iyo ineysan jirin wadooyin u go'an ee labada dhinac ee buundada waxay caqabad ku yihiin inay si badbaado ah ku safraan dadka lugeynaya iyo kuwa baaskiilada saaran



Gaadiidka dadweynaha oo xadidan: Waxaa jira fursado gaadiid aad u xadidan oo laaga gudbi karo buundada, basaska hadda shaqeeyana ma ahan kuwo leysku haleyn karo ayadoo ay sabab u tahay ciriiriga wadada iyo wiishka buundada oo kor loo qaado

Balanqaadyada isu socodka ee ka dhexeeya labada gobol

Bedelidda buundada sii duqoobeysa ee Interstate ee dul marta wabiga Columbia waxay muhiimad weyn u leedahay Oregon iyo Washington. Hogaamiye yaasha labada gobol waxay garwaaqsanyihiin in caqabadaha ku gadaaman buundada ay yihiin kuwo aan waxba laga qabanin, waxayna bishii January 2021 meel mariyeen miisaaniyad gaareysa \$50 malyan oo loogu talo galay in lagu bilaabo qorsheynta shaqada lagu bedelayo buundada. Guddi sharci dejin oo ka kala socda labada gobol oo ka kooban 16 Oregon iyo Sharci dejiyeyaasha Washington, waxayna bixin doonaan tilmaamo dheeraad ah iyo korjoogteyn ku aadan barnaamijka.

Howl wadeenada barnaamijka

Si loo helo hogaan goboleed abaabulan, Waaxyaha gaadiidka ee gobolada Oregon iyo Washington waxay si wada jir ah u hogaaminayaan barnaamijka Bedelidda Buundada Interstate ayagoo la shaqeyn doona 8 wakaaldood kale oo ka kala socda labada gobol.

Wakaaladaha sideedda ah waxay kala yihiin:

- ▶ TriMet
- ▶ C-TRAN
- ▶ Oregon Metro
- ▶ Gudiga Gaadiid Goboleedka Koonfur Galbeed Washington
- ▶ Magaalooyinka Portland iyo Vancouver
- ▶ Dekedaha Portland iyo Vancouver

Hanaanka Dib u eegista Deegaanka

Sida loo hormariyo qaab dhismeedka gaadiidkeena wuxuu saameyn ku leeyahay dabecadda iyo caafimaadka bulshooyinkeena, iyo midda deegaanka dabiiciga ah. Barnaamijka Bedelidda Buundada Interstate waxaa ka go'an inuu dhiiro geliyo habka ugu fiican ee loo yareyn karo, looga fogaan karo, laguna khafiifin karo saameynta bedelidda iyo ka shaqeynta wadadaan isku xirka halbowlaha u ah bulshadeena.

Marka loo eego howlo hore oo ka baaran degid ahaa, waxaa la qiyaasayaa inay qaadaneyso sedex illaa shan sano in la dhameys tiro qorsheynta iyo dib u eegista deegaaneed ee federaalka, sidoo kale in fasax laga helo federaalka intuusan dhismaha bilaaban kahor. Qaabka dib u eegista ee federaalka waa qasab marka loo fiiriyo xeerka Deegaanka Qaranka ee loosoo gaabiyo (NEPA) kaas la ansixiyay 1969 wuxuuna sharcigaas tilmaamayaa in ay wakiilada federaalka soo qiimeeyaan ayna la wadaagan saameynta deegaanka uu ku yeelanayo intaanan go'aanka la gaarin kahor.

Maamulka Waddooyinka Federaalka ee loosoo gaabiyo (FHWA) iyo Maamulka gaadiidka dadweynaha ee heer fedraal (FTA) waxay kor kala socan doonaan habsami u socodka barnaamijka dib u eegista deegaanka ee heer federaal, NEPA, waxaa kaloona laga yaabaa inay yeelato door dhaqaalo bixin haddii ilaha dhaqaalo bixinta heer federaal la cadeeyo. Wakaaladahaan waxay mas'uul ka yihiin xaqiijinta in barnaamijka u hogaansan yahay shuruudaha NEPA iyo sharciyada kale ee federaalka.

Go'aankeena ku aadan Sinnaanta

Barnaamijka Bedelidda Buundada Interstate waxaa ka go'an inaan cadaalad udub dhexaad uga dhigno howlaheena iyo natiijada kasoo bexaysa. Waxaan la falgaleynaa bulshada anagoo kor usoo qaadeyna codadka bulshooyinka taariikh ahaan la heyb sooco inta ay howsheena socato iyo sidoo kale inaan xaqiijino in bulshooyinka aan nala fahmaan faa'iidada dhaqaale uu ay ka heli karaan barnaamijka. Waxaa naga go'an in aanan dhib hor leh usii geysanin bulshooyinka

Kooxda barnaamijka ayada ayaa awoodeeda isku dhisi doonta ayagoo fahansan kala duwanaanshaha, Sinnaanta, iyo In loo dhanyahay (DEI) waxaana ka go'an inay si toos ah talooyin uga qaataan bulshooyinka kala duwan ee gobolka, khibradaha noloshooda iyo sheekooyinkooda. Si aan gacan uga geysano xaqiijinta in barnaamijkeena uu

cadaalad ku saleysnaado, waxaan u shaqaaleysiinay koox dhan oo sinnaanta iyo cadaaladda ka shaqeysa, waxaana hogaaminaya Sarkaalka Sare ee Sinnaanta

Qaab ay bulshada hormuud ka tahay ayaa asal u ah guusheena

Si aan u hubinoin inay is leeyihiin xalka bedeliadda buundada iyo baahida gobolka, barnaamijka wuxuu raadin doonaa xogta waxa muhiimka u ah dadka keligood ku safraaya buundada, ayagoo raacaaya bas ama wata baaskiil ay uga gudbaan buundada, marin ay maraan dadka aan lexaadkooda dhameystirneed ee kuraasta ku socda, xamuul laga soo daabulayo mid kamid ah dekadaheena, ama qof usoo jarmaadaya shaqo. La falgalidda bulshooyinka taariikh ahaan la faquuqo ayaa laf dhabar u ah dadaalka loogu jiro guuleysashada barnaamijkaan.

Kooxda La talinta Sinnaanta waxay gacan ka geysan doonaan in Barnaamijka Bedelidda Buundada Interstate ku saleysnaado cadaalad. Kooxda waxay sameyn doontaa talo soo jeedin ku aadan howsha, siyaasadda iyo go'anada laga yaabo inay saameyn ku yeeshaan bulshooyinka taariikh ahaan aan matalaadda helin iyo kuwa la faquuqo. Kooxda La talinta Dadweynaha waxay soo bandhigi doonaan talooyin ku aadan waxyaabaha ugu waaweyn ee kasoo baxaaya barnaamijka.




Qodobada ugu waaweyn ee la falgalidda bulshada

- ▶ Raadinta jawaab celin laga keenayo dadyoow kala duwan oo saamileey ah
- ▶ Kusoo daridda dadyowga aan matalaadda helin iyo kuwa la faquuqo
- ▶ Taageeridda Hal abuurka
- ▶ Yareynta caqabadaha hortaagan in bulshada lala falgalo
- ▶ Soo bandhigidda isla xisaabtan ayadoo daah furnaan jirto iyo jawaab celin
- ▶ Abuuridda kalsooni iyo aaminaad saamileyda iyo bulshada
- ▶ Bixinta fursado wax ku ool ah oo haga shaqada barnaamijka

Barnaamijka wuxuu qorsheynayaa howlo kala duwan sanadka 2021: si aan u helno jawaab celin, bulshadana aan noocyo kala duwan ula falgalno. Barnaamijka wuxuu kugula kulmayaa hadba meeshii aad joogto - na ogeysii haddii aad rabto in warbixin la siiyo ururkaaga. Fadlan booqo www.interstatebridge.org wixii soo kordha ama si aad noola soo xiriirto

Waqtiga uu qaanaayo barnaamijka



Sida nalala falgalo



HEL CUSBOONEYSIIN EMAIL

- ▶ Iska diiwaan geli si bille ah joornaalkeena iyo iimeylo sida loo joogaba mar ah

BIXINTA JAWAAB CELINTA

- ▶ Adeegso qaabka faalo bixinta online-ka ah
- ▶ Noogu soo qor email info@interstatebridge.org
- ▶ Soo wac xafiiska barnaamijkeena
 - 360-859-0494 (Washington)
 - 503-897-9218 (Oregon)
 - 888-503-6735 (toll-free)

BOOQO WEBSITE KEENA

- ▶ • Si joogto ah usoo booqo website ka barnaamijka IBR www.interstatebridge.org

NAGALA SOCO

- ▶ Nagala soco Twitter, facebook,iyo Instagram



OREGON

Dadka lexaadkooda dhameystirneen (ADA) ama Ciwaanka Xuquuqda aadanaha ee VI, Haddii aad u baahato adeegyo turjumaan, ama faahfaahin kaloo dheeri ah fadlan wac 503-731-4128, TTY 800-735-2900 ama Adeegga Isgaarsiinta Oregon 7-1-1.

WASHINGTON

Codsiyada ay soo gudbinaayaan dadka uusan lexaadkooda dhameystirneen ee ku nool Washington waxaa lagu diri karaa ayadoo lala xiriiraayo WSDOT Diversity/ADA Affairs team atKooxda u qaabilsan wsdotada@wsdot.wa.gov ama wac telefoonka bilaashka ah , 855-362-4ADA (4232). Dadka dhagoolka ah ama dhegaha kajiga codsi wey dirsan karaan ayagoo wacaayo adeega isgaarsiinta ee washington 711. Qof walboo ainsan in xaqiisa/xaqeeda ciwaanka VI lagu xadgudbay wuxuu dacwo ka xareyn karaa WSDOT's Office of Equal Opportunity (OEO) Title VI Agaasimaha asagoo kale xiriiraaya (360) 705-7090.